

Dhibaatooyinka goobta shaqada?

**Waxa aad u baahan tahay in aad ogaato.
La tacaalidda dhibaatooyinka goobta shaqada.**



acas

BIS | Department for Business
Innovation & Skills



TUC 

Warqaddani waxay bixineysaa macluumaad loogu talo galay shaqaalaha ka shaqeeyo goob kasta oo shaqo oo ka mid ah gudaha Britain'ta Weyn. Ma quseyso wakaalado badan shaqaalahooda ama iskood u shaqeystayaasha. Haddii aadan hubin haddey warqaddani ku quseyso iyo haddii kale, fadlan la xiriir mid ka mid ah ururada ku taxan bogga 3'aad. Warqaddani ma bixineyso talo sharciyeed.

Warqaddan waxaa soo saaray Talosiinta Muwaadiniinta iyo TUC (Kongareeska Ururka Ganacsatada), iyadoo taageero laga helayo Waaxda Ganacsiga, Mashaariicda iyo Nidaamyada Dib u habeynta iyo Acas (Adeegga, Talosiinta, Maslaxada iyo Dhexdhexaadinta).

Maxaan ku iraaahdaa loo shaqeeyaheyga haddii ay dhibaato iga heysato goobta shaqada?



Ma ii raaci karaa qof kulanka si looga hadlo dhibaatadeyda?



Tixraacyada barta internetka iyo lambarrada telefoonada

Waxaa dhibaato iga heysataa goobta shaqada – yaa i caawin kara?

Si aad u hesho macluumaad faahfaahsan oo ku saabsan wixii aad eeli laheyd, aad www.direct.gov.uk/resolvingdisputes

Si aad u akhriso Acas Code'ka la Raaco iyo tasmada la xiriirto, aad www.acas.org.uk/dgcode2009

Si aad ugala hadasho la taliyaha Acas arimaha la xiriiro shaqada, Ka wac qadka caawimaadda Acas halkan **08457 47 47 47** laga bilaabo 0800 ilaa 2000 maalmaha todobaadka ama laga bilaabo 0900 ilaa 1300 maalmaha Sabtida ama booqo www.acas.org.uk

Haddii aad xubin ka tahay itixaadka, la xiriir metelaha itixaadkaaga ama eeg www.worksmart.org.uk wixii ah talo iyo taageero la xiriirto arimaha shaqada.

Wixii macluumaad ah iyo si aad u heshid Xafiiska Talosiinta Muwaadiniinta nawaaxigaaga, eeg www.adviceguide.org.uk ama ka eeg diiwaanka telefoonada haddii aadaan heli karin internetka.

Wixii macluumaad ah oo ku saabsan mushaarka ugu hooseeyo, saacadaha shaqada, ama xuquuqda shaqaalaha ee lagugu dabakhayo haddii uu lacagt ku siiyo wakiil shaqo ama gangmaster'ka, ka wac Qadka caawimaadda Xuquuqaha Shaqee oo lacag Qaado hakan **0800 917 2368** ama booqo www.adviceguide.org.uk.

Diyaarinta la tacaalidda dhibaatooyinka goobta shaqada.

Dhibaatooyinka loo shaqeeyahaagu waxay soo hoos gelayaan mid ka mid ah qaybahan:

Cabashooyin: kuwani waa welwel, dhibaatooyin ama **cabashooyin aad u sheegto loo shaqeeyahaaga**. Waxay daboolayaan, tusaale ahaan, welwel aad ka qabto shaqadaada, qodobada iyo shuruudahaaga shaqo, xuquuqdaada heshiis iyo madda sharciyeed, ama sida laguula dhaqmo marka aad joogto goobta shaqada. Haddii dhibaataadaadu cabasho tahay, aad bogga 6'aad.

Arimaha dishibiliinka: **halka uu loo shaqeeyahaagu ka fikirsan yahay yahay** waxyaalaha ku saabsan in aad si aan wanaagsaneyn u dhaqanto, shaqada oo aad ka maqnaato ama habka aad shaqada u qabato; waxay u badan tahay in ay bilaabaan nidaamka dishibiliinka taas oo keeni karto tallaabo dishibiliin (oo ay jirto ceyrin kiisaska aadka u daran). Haddii ay shaqada kaa soo wajahdo arin dishibiliin, aad bogga 8'aad.

Waxaa jiro tiro ururro ah oo wax caawin karo haddey arimahaagu la xiriiraan dishibiliin iyo cabasho waxaad ka heli kartaa faahfaahintooda xiriirka bogga 3'aad. Waxaad talo ka heli kartaa waqti kasta adigoo la xallinayo dhibaataada loo shaqeeyahaaga.

Waa in aad mar kasta **isku daydaa in aad arimaha cabashada iyo dishibiliinka ku xallisaa goobta shaqada** haddiiba ay suurtoagal tahay. Waxay mararka qaarkood kaa caawin karaan in aad isticmaasho qof seddaxaad si uu kaaga caawiyo in aad dhibaataada xalliso.

Haddii aad dhibaataadaada ku xallin wayso goobta shaqada, **waxaad xaq u leedahay in aad dalbato maxkamadda shaqaalaha**. Waa in aad talo ka heshaa mid ka mid ah ururrada ku taxan boga 3'aad ka hor inta aadan arintan sameyn. Xusuusnow kiisaska intooda badan waa in aad codsi u qorataa maxkamadda shaqaalaha seddax bilood gudahood marka ay dhacday arinta aad ka cabaneysid. Haddii codsigaaga la helo waqtigaas la qabtay ka dib, maxkamaddu badanaa ma aqbali doonto. Haddii aad ka welwelsan tahay sida xaddidaadda waqtigu kuu quseyso, talo ka qaado mid ka mid ah ururrada ku taxan bogga 3'aad.

Soo gudbinta cabasho – waxa lagaaga baahan yahay in aad sameyso *

Xusuusnow: marka lala tacaalayo cabashadaada – waxaa mar kasta muhiim ah in la qoro wixii dhacay iyo goorta ay dhaceen.

1 Hadal

Badanaa habka ugu wanaagsan ee loogu soo gudbiyo cabashadaada loo shaqeeyahaaga waxaa weeye in kulan aan caadi aheyn lala yeesho maareeyahaaga si loogu sharaxo waxyaalaha aad tabaneyso. Waxaa laga yaabaa in ay faa'iido kuu yeelato in aad u soo jeediso loo shaqeeyahaaga waxa aad ka dooneyso si loo xalliyo dhibaataada. Haddii aadan dareemeyn in aad la hadli kartomaareeyahaaga kuugu dhow, waa in aad la hadashaa qof kale oo shirkadda ka tirsan oo mas'uulsare ah.

Haddii aadan ku xallin karin cabashadaada adiga oo toos ula hadlayo maareeyahaaga, arinta xigta ee aad sameyn karto waxaa weeye in aad marto nidaamka cabashooyinka caadiga ah ee loo shaqeeyahaaga. Waxaad arintan ka heli kartaa Buugga Shirkaddaada, HR ama buugga Shaqaalaha, ama heshiiskaaga shaqaalenimada. Nidaamyadan waxaa caadiyan ku jiro tallaabooyinka 2-5:

2 Qoraal

Waa in aad u qortaa loo shaqeeyahaaga faahfaahinta cabashadaada. Warqaddaadu waa in ay taariikh lahaataa waana in aad nuqul heysataa. Haddii aadan hore sidaa u soo yeelin, waxaa dhici karta in ay ku caawiso in aad u sheegto loo shaqeeyahaaga sida aad jeclaan laheyd in loo xalliyo dhibaataada.

*Macluumaad ku qoran warqaddan ee la xiriiro la tacaalidda cabashooyinka wuxuu ku saleysan yahay Code'ka la Raaco ee Acas. Waa muhiim in aad ka warheyso in maxkamadaha shaqadu tixgelinayaan in la raacitaan la'aanta Code'ka Acas aaney sabab laheyn waxayna abaalmarin kor iyo hoos gaareyso ilaa 25% haddii ay dareemaan in adiga ama loo shaqeeyahaaga aad raaciweyseen Code'ka la Raaco ee Acas. Waxaad ka heli kartaa Code'ka Acas adigoo isticmaalayo link'ga bogga 3'aad.

3 Kulan

Loo shaqeeyahaagu waa in uu ku diyaariyaa kulan hordhac ah waqti macquul ah waana in uu kaala hadlaa cabashadaada. Waxaad xaq u leedahay in uu qof kuu soo raaco kulanka – ama saaxiibka aad isla shaqeysaa ama qof meletelayo ururka ganacsatada. Loo shaqeeyahaagu waa in uu ku siiyaa fursad aad ku sharaxdo cabashadaada iyo wixii talooyin ah ee aad heyso ee lagu xallinayo arinata. Kulanka ka dib, loo shaqeeyahaagu waa in kuu soo diraa warqad uu ku sharaxayo wixii ay go'aansadeen.

4 Racfaan

Haddii aadan ku raacsaneyn go'aanka loo shaqeeyahaaga, waa in aad u dirtaa loo shaqeeyahaaga warqad aad ku sheegeyso in aad racfaan ka qaadaneyso go'aanka loo shaqeeyaha kuna sharaxeyso sababta aadan ugu waafaqsaneyn go'aanka. Loo shaqeeyahaagu waa in uu diyaariyaa kulan kale oo looga hadlayo racfaankaaga iyo halka ay suurtagal ku tahay, maareeye kale oo sare waa in uu racfaankan la tacaalaa. Waxaad xaq u leedahay in uu qof kale kuu soo raaco kulanka – ama saaxiib aad isla shaqeysaan ama qof meletelayo ururka ganacsatada. Racfaankan ka dib loo shaqeeyahaagu waa in uu kuu soo diraa warqad uu kuugu sheegao go'aanka kama dambeysta ah.

5 Raadi waddooyin kale

Haddii aadan weli ku faraxsaneyn go'aanka loo shaqeeyahaaga, waxaad qaadi kartaa waddooyin kale oo lagu xallinayo cabashadaada. Faahfaahinta qaar ka mid ah waddooyinka kale ee kuu furan waxay ku qoran yihiin bogga 10'aad.

La tacaalidda arimaha dishibiliinka iyo ruqseynta – waxa aad u baahan tahay in aad ka ogaato*

1 Hadal

Sida ugu horeyso ee aad ku ogaan karto dhibaato idiin dhexeyso adiga iyo loo shaqeeyahaaga waxaa weeye marka uu isaga/iyada ay ku waydiiyaan in ay kaala hadlaan arin ay kaa tabanayaan. Waxaa badanaa wanaagsan in kulankan laga dhigo mid aan caadi aheyn marka ugu horeyso waayo waxaa dhici karta in arintan ay keentay is-faham la'aan, waxaa dhici karta in aad keento caddeyn (tusaale ahan. waraaqo dhaqtar) si aad u bayaaniso arintan. Waa in aad, si kastaba ha ahaatee, aad qorotaa wixii la isku raacay.

Waxaa dhici karto in loo shaqeeyahaagu, si kastaba ha ahaatee, uu go'aansado in uu raaco nidaamka dishibiliinka iyo ruqseynta caadiga ah. Nidaamyadan waxaa badanaa ka md ah tallaabooyinka 2-5:



2 Hel warqad

Haddii loo shaqeeyahaagu ka fekerayo in uu qaado tallaabo dishibiliin ama ruqseyn, tallaabadiisa ugu horeyso waa in ay noqotaa in uu warqad kuu soo diro taas oo ay ku qoran yihiin cabashooyinka lidka kugu ah. Arintan waa in uu ka mid ahaadaa macluumaad macluumaad ku filan oo ku saabsan dhaqan xumida lagugu soo eedeeyay ama howl qabad la'aanta si aad fursad ugu hesho in aad jawaab ama sharaxaad ugu diyaarsato kulanka.



*Macluumaadka warqaddan ku qoran ee la xiriiro arimaha dishibiliinka iyo cayrinta wuxuu ku saleysan yahay code'ka la raaco ee Acas. Waa muhiim in aad ka war heyso maxkamadaha shaqadu tixgelinayaan in raacitaan la'aanta code'ka Acas aaney sabab laheyn waxayna siin karayaan abaalmarin gaareyso ilaa 25% haddii ay dareemaan in adiga ama loo shaqeeyahaagu aad raaci wayseen Code'ka la raaco ee Acas. Waxaad ka heli kartaa Code'ka Acas adigoo isticmaalayo link'ga bogga 3'aad.

Xusuusnow: marka lala tacaalayo tallaabo dishibiliin ama ruqseyn – waxaa mar kasta muhiim ah in la qoro wixii dhacay iyo goorta ay dhaceen.

3 Kulan

Mar allaale marka uu loo shaqeeyahaagu qoraal kugula soo xiriiro, waa in ay ku diyaariyaan kulan waqti macquul ah iyo goob si arinta looga hadlo. Loo shaqeeyahaagu ma qaadi karo tallaabo dishibiliin kulankaas ka hor. Waxaad xaq u leedahay in uu qof kuu soo raaco kulanka – ama saaxiib aad isla shaqeysaan ama qof metelayo ururka shaqaalaha. Loo shaqeeyahaagu waa in uu ku siiyaa fursad aad kaga soo gudbiso kiiskaaga kulanka. Kulanka ka dib, loo shaqeeyahaagu waa in uu kuu sheegaa wixii ay go'aansadeen waa in uu kuugu sheego qoraal ahaan.

4 Racfaan

Haddii aadan ku raacsaneyn go'aanka loo shaqeeyahaaga, waa in aad u dirtaa loo shaqeeyahaaga warqad aad ku sheegeyso in aad racfaan ka qaadaneyso go'aanka loo shaqeeyaha kuna sharaxeyso sababta aadan ugu waafaqsaneyn go'aanka. Loo shaqeeyahaagu waa in uu diyaariyaa kulan kale oo looga hadlayo racfaankaaga. Waxaad xaq u leedahay in uu qof kale kuu soo raaco kulanka – ama saaxiib aad isla shaqeysaa ama qof metelayo ururka shaqaalaha. Waa in aad hubisaa in aad qoraal ka sameysato kulanka racfaanka. Kulanka racfaanka ka dib loo shaqeeyahaagu waa in uu kuu soo diraa warqad uu kuugu sheegayo go'aankooda kama dameysta ah.

5 Hel waddooyin kale

Haddii aadan weli ku faraxsaneyn go'aanka loo shaqeeyahaaga, waxaad tixgelin kartaa waddooyin kale oo lagu xallinayo arinta. Faahfaahinta qaar ka mid ah waddooyinka furan waxaa laga heli karaa bogga 10'aad waxaadna kala xiriiri kartaa Acas wixii talo iyo macluumaad dheeraada ah.

Waddooyinka furan ee lagu xallinayo arimaha cabashada iyo dishibiliinka

A Dhexdhexaadin*

Adiga ama loo shaqeeyahaaga ayaa waxaa dhici karto in aad ku fekertaan dhexdhexaadintu in ay tahay baka lagu xallinayo dhibaataada. Dhexdhexaadintu waa mutadawacnimo waana qarsoodi gebi ahaan.

Waxaa ka qaybqaadanayo qof dhexdhexaad ah, oo madax bannaan oo idinka caawinayo adiga iyo loo shaqeeyahaaga in aad gaartaan xal idiin wada cuntamo. Mararka qaarkood dhexdhexaadiyuhu wuxuu ka imaan karaa isla meesha aad ka shaqeeyso, ama adiga ama loo shaqeeyahaaga waxaad ku fekeri kartaan in dhexdhexaadiye dibadda laga keeno. Haddii dhexdhexaadinta lagu guuleysan waayo, weli waxaa kuu furan fursado kale sidaas darteed waxba kaagama lumayaan haddaad isku daydo.

B Maslaxo hore

Haddii aad dareento in aysan jirin waddo kale oo furan oo kuu hartay si aad dalab ugu sameyso maxkamadda shaqaalaha, Acas' adeegga maslaxada hore ayaa laga yaabaa in uu ka caawiyo adiga iyo loo shaqeeyahaaga **helitaanka hab lagu xallinayo arinta loogana fogaanayo baahida dalbashada maxkamadda shaqaalaha**. Kani waa adeeg bilaash ah oo u furan shaqaalaha iyo loo shaqeeyahaasha kuna aaddan arimaha kordhinayo dacwadaha maxkamadda shaqaalaha. Waa in aad wacdaa qadka caawinta Acas si aad u ogaato hadduu adeegani kugu haboon yahay.

*Ogow adeegga dhexdhexaadinta ee dibadda a imaanayo bilaash ma aha. Haddaad adiga iyo loo shaqeeyahaagu isku raacdaan in aad isticmaashiin dhexdhexaadin, waa in aad isku waafacdiin yaa bixinayo qarashka. Kharashkan badanaa waxaa bixyo loo shaqeeyaha.

Waxaad ka wici kartaa Acas si aad u ogaato in badan oo ku saabsan mid kasta oo ka mid ah waddooyinka furan halkan **08457 47 47 47.**

Xusuusnow, in dhibaatooyinka goobta shaqada aysan qasab aheyn in ay noqdaan kiisaska maxkamadda shaqaalaha oo ku xallinta dhibaataada goobta shaqada ay tahay waddo kale, marka aad awooddo, waxay kaa badbaadin kartaa walbahaarka waxayna kaa caawin kartaa dhowrista xiriir shaqo oo wanaagsan.

C Sameynta dalabka maxkamadda shaqaalaha

Haddii aad ku soo hungowday waddooyinka kale si aad u xalliso dhibaataada goobta shaqada oo aad weli dareemeyso in aan laga hadlin waxyaalaha aad tabaneyso, **waxaad saemyn kartaa dalabka maxkamadda shaqaalaha**.

Xusuusnow in kiisaska intooda badan ay tahay in aad codsi u gudbiso maxkamadda shaqaalaha seddax bilood gudahood laga bilaabo taariikhda ay dhacday arinta aad ka cabaneyso. Haddii codsigaagu yimaado waqtigan la xaddiday ka dib, maxkamaddu caadiyan ma aqbali doonto.

Waxaad xaq u leedahay in aad dalab u gudbiso maxkamadda shaqaalaha iyadoo aan la eegeyn haddaad adiga ama loo shaqeeyahaagu raacdeen dhammaan macluumaad ku qoran ama qaar ka mid ah boggaga soo socdo ee warqaddan taas oo ku saleysan tasmada Code'ka la Raaco ee Acas. Waxaa muhiim ah in laga warhayo, si kastaba ha ahaatee, in maxkamadda shaqaalaha ay tixgelin doonto haddey raacitaan la'aanta Code'ka Acas uu ahaa mid aan macquul aheyn waxayna awoodi doonaan in lagu jimeeyo awards'ka kor ama hoos 25% haddii ay dareemaan in adiga ama loo shaqeeyahaaga midkiin uu ka baaqsaday in uu raaco Cod'ka la Raaco ee Acas, taas oo uu macluumaadkani ku saleysan yahay. Waxaad ka heli kartaa Code'ka Acas adigoo isticmaalyo link'ga bogga 3'aad.

Dadka intooda badan waxaa ku adag gudbinta dalab sharciyeed hab aan sahlaneyn waxaana muhiim ah in la fahmo dhinacyada muhiimka ah ee sharciga iyo nidaamyada ku haboon kiiskaaga maxkamadda. Waxaad dabcan dooneysaa in aad talo hesho marka aad marxaladdan ku jirto haddii aadan hore arintan u soo sameyn. Xatta marka aad dalabkaaga gudbiso ka dib, Acas weli waxay diyaar u tahay in ay ka caawiso adiga iyo loo shaqeeyahaaga sidii aad u heli laheydeen hab lagu xallinayo kiiska ka hor inta uusan gaarin maxkamadda shaqaalaha.



Printed in the UK on recycled paper containing a minimum of 75% post consumer waste.
Department for Business, Innovation and Skills. www.bis.gov.uk
First published Sept 2009. Crown Copyright. BIS/09/09/NP. URN 09/1308 (Somali)